


CODBIXIYAHA

★ MUSTAQBALKA ★

16 iyo 17 sanno jirka ayaa hore isku sii diwaan gelin kara si ay u codeeyaan oo si toos ahna loo diwaan gelinayo si ay u codeeyaan marka ay gaaraan 18 jir.

KA QAYBQAADASHADA CODBIXIYAHA 18-24 JIR EE KA QAYBQAATAY DOORASHOYINKII GUUD



SIDEEN UGU QALMAA?


SI AAD U NOQOTO CODBIXIYAHA MUSTAQBALKA, WAA INAAD TAHAY...



Ugu yaraan
16 jir



Muwaadin
Mareykan ah



Degan
Washington

Haddii aad bilowdo codbixinta adigoo yar, waxay noqonaysaa caado. Marka dhallinyaradu ay caado ka dhigtaan inay si joogto ah u codeeyaan - doorasho kasta mid weyn ama yar - waxay yeelan doonaan awood doorasho ahmiyad leh.

SIDEEN ISKU DIIWAAN GELIYAA?



Waxaad ka codsan kartaa barta internetka VoteWa.gov adigoo isticmaalaya leesankaaga darawalnida ee Washington ama aqoonsiga gobolka.



Haddii aadan haysan leesan, isticmaal afarta lambar ugu dambeeya ee Sooshiyaal Sekuuriti Lambarkaaga kadibna foomka diiwaan gelinta boostada ugu soo dir xafiiska doorashooyinka ee degmadaada. Waxaa sidoo kale isku diiwaan gelin kartaa shakhsi ahaan halka xafiiska doorashooyinka degmadaada.

MAXAA DHACA MARKAAN IS DIIWAAN GELIYO KADIB?



Warqadda codbixinta ayaa si toos ah boostada lagugu soo diri doonaa doorashada ugu horaysa ee aad u qalanto inaad codeyso.



Waxaad warqaddaada codbixinta ku soo celin kartaa adeega boostada - shaabadda lacagta looma baahna. Hubi inay lahaato calaamadda boostada ugu dambeyn Maalinta Doorashada.



Ama waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuqa warqadda codbixinta ee Doorashooyinka Degmada King ee sugan ilaa iyo 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

HADDII AAD GALAYSO 18 JIR INTA U DHAXAYSA TAARIIKHYADAN....



maalinta
dhalashada

WAXAAD AWOODDAA INAAD KA CODEYSO DOORASHADA HORDHACA.

Agoosto
doorashada
Hordhaca

Sebtembar

Oktoobar

Nofeembar
doorashada
Guud

codeyn!

Doorashooyinka Degmada King
209-296-VOTE(8683)
kingcounty.gov/elections

Nagala Soco Barta Bulshada
@kcelections